



Caawimada Teknoolojiyadda iyo Taageerooyinka Kale ee PPS ee Ardayda iyo Qoysaska

26 ka Ogosto, 2020

Qoysaska PPS ee Sharafta leh,

Halkan Dugsiyada Dadwaynaha Portland waxaanu sii wadnaa ka shaqaynta hubinta in ardayda iyo qoysasku ay helaan taageerada ay u baahan yihiin si ay ugu bilaabaan sanad dugsiyeedka onlayn. Waxaanu rabnaa inaan idin la wadaagno khayraad dhawr ah oo aad heli kartaan:

Bogga Khayraadka Dayrtta 2020 ee PPS

Waxaanu sii wadaynaa inaanu cusboonaysiino webbeejkayaga Dayrtta 2020, pps.net/Fall2020.

Toddobaadkan waxaanu ku darnay qayb muujinaysa dagalada iyo qalabka webka ee ardaydu u baahan doonaan maadaama aanu ku bilaabayno sanad dugsiyeedka waxbarashada onlaynka ah oo socon doontaa ilaa ugu yaraan 5 ta Noofambar. Qaybta waxa kamid ah tilmaamo iyo fiidyawyo loogu talogalay dagaladayada iyo app-yada muhiimka ah. Seesaw, Canvas, Remind, Google Meet iyo Clever. Khayraadka loogu talogalay qoysaska waxa lagu qorayaa lixda luuqadood ee PPS ictiraafsan tahay.

Miiska Caawimada Teknoolojiyadda PPS

Miiska Caawimada Teknoolojiyadda PPS wuxuu shaqeeyaa 7:00 g.h. ilaa 5:00 g.d. maalmaha dugsiyada la dhiganayo si uu uga siiyo taageero waalidiinta, wakiilada, ardayda iyo qoysaska sida loo isticmaalayo dugsiga onlaynka ah. Waxaanu ka jawaabi doonaa su'aalihiina oo idin la wadaagi doonaa macluumaad iyo qodobbo faa'ido leh oo kusaabsan dagalada teknoolojiyadda waxbarashada fogaanta, app-yada, xiriirka internetka iyo waxyaalo kale oo muhiim u ah ardaydiina.

- Wac 503-916-3375 ama iimeyl u dir support@pps.net

Khadka Qoyska Luuqadaha Badan ee PPS

[Khadka Qoyska Luuqadaha Badan ee PPS](#) waa adeeg loogu talogalay waalidiinta ama wakiilada (dhammaan luuqadaha PPS ictiraafsan tahay) si ay ula xiriiraan oo ay ugala hadlaan dugsiyada cuntada, caawimada teknoolojiyadda ee fasalada onlaynka ah, waxbarista gaarka ah, la hadlidda macallinkaaga, khayraadka iyo macluumaadka COVID, iwm. Fadlan wac lambarradan:

- Español: 503-916-3582
- 中文 : 503-916-3585
- Tiếng Việt: 503-916-3584
- Soomaali: 503-916-3586
- Русский: 503-916-3583

Waxaanu rajaynaynaa inaad ka faa'idaysataan khayraadka sare haddii aad wax su'aalo ah ka qabtaan waxbarashada teknoolojiyadda ee dhawaan ilmahaagu adeegsan doono. Halkan caawimadaada ayaanu u joognaa!